

# 2020-2021 Shuruudaha Tallaalka ee Dugsiga Missouri

- Dhammaan ardayda waa inay soo bandhigaan dukumiinti ku saabsan xaaladda tallaalka ee ugu dambeeyay, oo ay ku jiraan bil, maalin, iyo sannad tallaalka kasta inta aanu iman dugsiga.
- Guddiga La-Talinta ee Habdhaqanka Tallaalka (ACIP) waxay oggolaanayaan muddo 4-maalmood oo dib u-dhigis ah. Ardayda heerarka fasallada oo dhami waxay heli karaan tallaalka ilaa afar maalmood kahor taariikhda la rajaynayo.
- Tallaalada loo baahan yahay waa in la qaataa iyadoo loo eegayo Jadwalka hadda ee Guddiga La-Talinta ee Habdhaqanka Tallaalka, oo ay ku jiraan dhammaan muddo u dhaxaysiin, (<http://www.cdc.gov/vaccines/schedules/index.html>).
- Si ay ugu sii jiraan dugsiga, ardayda "horumarka ku jira" waa inay haystaan Tallaalka Foomka Horumarka (Imm.P.14) ee faylka. Horumarka micnihiisu waa in ilmuhu bilaabay taxanaha tallaalka oo ballan u haysto daawo-siinta xigta. Ballantan waa in la hayaa iyo diiwaanka cusub ee la siiyay dugsiga. Haddii ballanta aan la hayn, ilmuhu kama sii mid aha horumarka oo waa mid aan addeecayn. (tusaale, taxanaha tallaalka ee Hep B ayaa la bilaabay laakiin ilmuhu weli uma qalmo inuu qaato daawo-siinta xigta ee taxanaha.)
- Ka cafinta Diimaha (Imm.P.11A) iyo Caafimaadka (Imm.P.12) waa la oggol yahay. Kaarka ka cafinta ee ku habboon waa inuu ku jiraa feylka. Carruurta aan la tallaalin waxay ku qasban yihiin inay ka baxaan dugsiga markay dillaacaan cuduro laga hortagi karo.

Tallaalada loo baahan yahay ee Imaanshaha Dugsiga	Daawo-siinta loo baahan yahay Fasalkii ba.												
	K	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12
DTaP / DTP / DT	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+
Tdap <sup>2</sup>									1	1	1	1	1
MCV <sup>3</sup> (meningococcal conjugate)									1	1	1	1	2
IPV (Polio) <sup>4</sup>	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+
MMR <sup>5</sup>	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2
Hepatitis B	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+
Varicella <sup>7</sup>	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	1	1

1. Daawo-siinta ugu dambaysa markay tahay dhalashada afaraad ama kadib iyo daawo-siinta ugu dambaysa ee xiiqdheerta carruurta kahor dhalashada toddobaad.  
**Inta ugu badan ee loo baahan yahay:** lix qaadasho.
2. **Fasallada 8-12:** Tdap, oo ka kooban tallaalka xiiq-dheerta, ayaa loo baahan yahay.
3. **Fasalka 8-11:** Hal daawo-siin oo ah MCV ayaa loo baahan yahay. Daawo-siinta waa in la siiyaa kadib da'ada 10 sanno.  
**Fasalka 12:** Laba daawo-siin oo tallaalka 'MCV' ah ayaa loo baahan yahay haddii aan tallaalka koowaad la siinin arday da'disu ahayd 16 jir ama ka weyn, kiiskan oo kale hal daawo-siin ayaa loo baahan yahay. Ugu yaraan hal daawo-siin waa in la siiyaa kadib da'ada 16 sanno.
4. **Fasalka 10aad ee Xaddaanada:** Daawo-siinta ugu dambaysa waa in la siiyaa dhalashada afaraad ama kadib. Faraqa u dhexeeya daawo-siinta ku-xigta iyo ta u dambaysa waa inay ahaataa ugu yaraan lix billood.  
**Fasallada 11-12:** Daawo-siinta ugu dambaysa markay dhalatay ama kadib dhalashada afraad. Isku-darka kasta ee afarta daawo-siin ee IPV iyo OPV waxay ka kooban yihiin taxane dhammaystiran. **Inta ugu badan ee loo baahan yahay:** afar daawo-siin
5. Daawo-siinta ugu horreysa waa in la siiyaa markay tahay ama kadib da'ada laba iyo toban bilood.
6. Waa in ugu yaraan afar toddobaad ay u dhaxayso daawo-siinta koowaad iyo labaad; ugu yaraan 8 toddobaad ay u dhaxayso daawo-siinta labaad iyo saddexaad; ugu yaraan 16 toddobaad ay u dhaxayso daawo-siinta koowaad iyo saddexaad oo daawo-siinta ugu dambaysa waa in la siiyaa ugu yaraan wakhti aan kahorayn da'ada 24 toddobaad.
7. Daawo-siinta ugu horreysa waa in la siiyaa markay tahay ama kadib da'ada laba iyo toban billood.  
**Fasalka 10aad ee Xaddaanada:** Caddayn lagu qanco oo cudur ah, daryeel bixiye caafimaad oo shaati leh ayaa laga yaabaa inuu saxeexo oo uu geliyo faylka dugsiga qoraal caddayn ah oo ku saabsan bishii iyo sannadkii hore ee cudurka hablo-baasta.  
**Fasallada 11-12:** Caddayn lagu qanco oo cudur ah, waalidka/mas'uulka ama MD ama DO wey saxeexi karaan oo ku meeleyn karaan faylka dugsiga bayaan qoraal ah oo caddaynaya bisha iyo sannadkii hore ee cudurka hablo-baasta.

